

LIFAAQA I

Talo soo jeedinta Guddiga Farsamo ee Arrimaha Mileteriga

Hay'adaha Amniga ee Dowladda Federaalka Ku Meel Gaarka (TFG),
Qaabdhismeedkooda iyo Kaabayaasha lagu taageero:

- i. Dowladda KMG waxay u baahyantahay inay si dhaqsa ah u hawlgasho sidii ay u casriyayn lahayd una ansaxin lahayd Qorshaha Amniga and Xasilinta ee heerka Qaran.
- ii. Dowladda KMG iyo Guddiga Wadajirka arrimaha Amniga JSC ayaa dib u eegaya si dhaqsa ahna u ansaxinaya dhaqangelinta talo soo jeedinta Guddiga Qiimeynta Arrimaha Amniga.
- iii. Guddiga JSC wuxuu deeqbixiyeyaasha ka raadin doonaa sidii dayactir loogu sameyn lahaa Wasaaradda Gaashaandhigga/ xarunta Ciidamada.
- iv. Ciidamaga Dowladda KMG waa in lagu taageeraa xarumo caafimaad, iyo daryeel bulsho iyo waxyaabaha kale ee la xiriira baahidooda nololeed.

Habdhismeedka Isudwidda Wadajirka ah:

- i. Guddiga JSC wuxuu ansaxinayaa habdhismeedka Isudwidda Wadajirka ah sida uu ku taliyay Urur Goboleedka IGAD, oo uu ansaxiyay Midowga Afrika.
- ii. Guddiga JSC wuxuu hoosta ka xariiqayaa baahida loo qabo in si dhaqso ah ciidamada Ahlu Sunna wal Jama'a (AWSJ) loogu soo biiriyo ciidamada Dowladda KMG, booliiska iyo habdhismeedka hay'adaha amaanka.

Tababar:

- i. Dowladda KMG waxay ballanqaadaysaa inay 1da September 2010 soo gudbiso magacyada iyo faahfaahinta dadka ciidamada loo qoro kooxda

labaad ee loo dirayo tababarka Midowga Yurub ee ka dhaca Uganda, iyagoo wata nidaam aqoonsi.

- ii. Dowladda KMG iyo Midowga Yurub waxay ka wadatashanayaan baahida tababar ee ciidamaha Dowladda KMG ee mustaqbalka, gaar ahaan wixii la xiriira arrimaha farsamo iyo takhasuska ciidamada.
- iii. Bulshada caalamka, qorshaha waqtiga dhow, waxay ka fikiraysaa sidii tababarka ciidamada Soomaaliyeed loogu qaban lahaa dalka gudahiisa.

Carruurta oo askar laga qoro:

- i. Siyaasadda Dowladda KMG waxay ku salaysantahay in carruurta aan askar laga qorin ama in aan la adeegsan askar carruur ah, waxayna soo dhoweynaysaa oo ku ballanqaadaysaa inay bulshada caalamka kala shaqeyso sidii loo dejin lahaa hanaan lagaga hortago carruurta oo askar laga qoro (ka yar 18 sanno) oo ay ku kacaan kooxaha oo dhan;
- ii. Dowladda KMG waxaa loogu baaqayaa inay sameeyso guddi u hawlgala xaqiijinta in si dhaqso ah loo hirgeliyo talooyinka Kooxda Shaqo ee Gogalaha Amaanka ee ku saabsan Carruurta iyo Colaadda Hubaysan (Desembar 2008, S/AC.51/2008/14).
- iii. Maadaama kooxaha hubaysan, oo ay ka midyihiin Al-Shabab, iyo burcad badeedda ay qoranayaan carruurta, waxaa loo baahanyahay in bulshada caalamka iyo Dowladda KMG ay iska la shaqeeyaan sidii kab nololeed kale iyo waxbarasho loogu heli lahaa dhallinyarada Soomaaliyeed.

Mushaaraadka:

- i. Waa la iswaafajiyo habka mishear bixinta iyadoo la raacayo nidaam qura, oo qayaxan, oo hufan si loo helo hab mishear bixin ee jiri karta muddo dheer. Sidaas darted, UNPOS waxay isku dayi doontaa inay ka shaqayso sidii loo heli lahaa nidaam mushaar bixin la siiyo shaqaalaha booliiska iyo mileterigaba.

- ii. Waxaa hoosta laga xarriigay baahida loo qabo in la raadiyo deeqbiyeyaal dheeraad ah oo taageera mushaar bixinta ciidamada amniga Soomaaliyeed. Xafiiska Qaramada Middobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliyeed ayaa horseed u noqon doonta taageero laga raadiyo deeqbixiyeyaasha kale.